IIB MA GALO

# FAAFIN RASMI AH

# الجريدة الرسمية

EE JAMHURIYADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 3aad | Muqdisho, 1 Nofembre 1975 | L. 11

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA | جريده شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

# KOBNIIN

## BOGGA KOWAAD

SHARCI L. 61 ee 21 Oktoobar 1975 — *La wareegid ganacsiga dibad ka keenka Baabuurta iyo Toleyn Hoosooyinka Waaweyn.* Big. 821

SHARCI L. 62 ee 21 Oktoobar 1975 — *La wareggidda ganacsiga dibad ka keenka iyo qeybinta: dharka, maacuunka guryaha iyo qalabka Xafiisyada.* » 823

SHARCI L. 63 ee 21 Oktoobar 1975 — *Keenidda iyo qaybinta qalabka Takhtarrada, Caafimaadka cuntada daaweysan ee Caruurta iyo kiimikada.* » 825

SHARCI L. 64 ee 21 Oktoobar 1975 — *Keenidda iyo qeybinta qalabka biyaha looga soo saaro Webiyada iyo ceelasha.* » 826

SHARCI L. 65 ee 21 Oktoobar 1965 — *Keenidda iyo qeybinta Dahabka iyo Qalinka.* Bog. 827

SHARCI L. 66 ee 21 Oktoobar 1975 — *la wareggidda ganacsiga dibad ka keenka alaabta musikada, masawirka iyo siinamada.* » 829

Madbacadda Dawladda -- Muqdisho

SHARCI L. 67 ee 21 Oktoobar 1975 — *Dhismaha Wakaaladda Ganacsiga Gaadiidka iyo Qalabka dayactirka* » 832

SHARCI L. 68 ee 21 Oktoobar 1975 — *Dhismaha Wakaaladda Ganacsiga Dharka iyo maacuunka.* » 838

## BOGGA LABAAD

### XEER

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, L. 147 ee 21 Oktoobar 1975 — *Keenidda iyo qeybinta cagafcagafyada iyo makiinadaha Beeraha.* » 843

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, L. 148 ee 21 Oktoobar 1975 — *Keenidda Qalabka Xafiisyada, Dugsiyada, Makiinadaha Qoraalka iyo Xissaabaadka.* » 844

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, L. 149 ee 21 Oktoobar 1975 — *Keenidda iyo qaybinta qalabka dabka ama korontada ee guryaha iyo qalabka aragtida.* » 846

---

## BOGGA SEDDEXAAD

### TALOOYIN ISGARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

W. M.

# BOGGA KOWAAD

**SHARCI L. 61 ee 21 Oktoobar 1975.**

**La wareegid ganacsi dibedda ka keenka Boabuurta iyo toleyn hoosooyinka waaweyn.**

MADAXWEYNAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Warqadda 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

ISAGOO AQOONSADAY Iney tahay lagama maarmaan in lala wareego kanacsiga dibada ka keenka ee Baabuurta, cagf-cagafyada, qalabka dayactirka iyo in la tolleeyo hoosooyinka iyo qalabka la xiriira.

ISAGOO TIXGELINAYA Go' aanka Golaha Sare ee Kacaanka iyo kan Xoghayayaasha Dowladda;

WUXUU SOO SAARAYA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Marka laga bilaabo taariikhda u dhaqan galo Sharcigan, waxay Dawladdu la wareegtay dhammaan ganacsiga dibad ka keenka waxyaabaha hoos ku tilmaaman:

1. Baabuurata (autoveicoli) nooc kasta ha ahaadeene iyo qalabka dayactirka (pezzi di ricambio).
2. Cagaf- cagafyada iyo qalabka la xiriira.
3. Makiinadaha beeraha lagu tacbo nooc kasta ha ahaadeene.
4. Matoorada webiyada iyo ceelasha biyaha looga soo saaro iyo qalabka la xiriira.

Qodobka 2aad

1.. Waxaa la Tolleeyay Hoosooyinka (Officine) waaweyn ee lagu hagaajiyo baabuurta qalabna dibadda ka keena; makiinadaha dhexyaalla ee lagu haggaajiyo baabuurta ama cagaf-cafyada; qalabka dayactirka (pezzi di ricambio) ee waqtigaan laga heli karo bakhaaradda ama L.C. u furan yahay.

2. Waxaa Hoosooyinka la Tolleeyey ka mid ah wax alla wixii gurya'a ama xafiisya'a ee la xiriira Hoosooyinka la Tolleeyay.

Qodobka 3aad

Ruqsadaha horey loo bixiyay ee la xiriira Hoosooyinka Waaweyn ee la Tolleeyay, ganacsiga dibad ka keenka baabuurta, cagaf-cagafyada, qalabka dayactirka iyo wixii la xiriira, waa la baabi'iyay marka laga bilaabo taariikhda u dhaqan galo sharcigan.

Qodobka 4aad

Shaqaalaha ka shaqeeya Hoosooyinka la Tolleeyay waxey ka mid noqon doonaan shaqaalaha Dawladda xuquuqdoodana waxaa la wareegtay Dawladda.

Qodobka 5aad

Wixii maalgelin lahaa ee xisaab ka dib qiima yeesha Dawladdu dadkii lahaa xoolahaas waxey siineysaa magdhow u dhigma xoolaha lagala wareegay.

Qodobka 6aad

Dukaanleyda yar yarka ah ee ka beecmushtari jiray qalabka ku xusan qodobbada 1aad iyo 2aad ee sharcigaan waa iney caddeeyaan (denuncia) wixii qalaba ee maanta ku jira dukaannadooda ayagoo liiska qalabka lala wareegay u geynaya Ciidamada ilaaliya canshuuraha (Polizia Tributaria), meeshii aney joogin Ciidamada Canshuurtuna waa iney u geeyaan Saldhigga Booliska ee ugu dhow.

Qodobka 7aad

Guddiga Dhaqaalaha ee G.S.K. ayaa loo xilsaaray inay dhisaan Guddi la xisaabtama dadka xoolaha lagala wareegay.

Qodobka 8aad

Ciidamada Amniga ayaa loo xilsaaray iney fuliyaan sharcigan.

Qodobka 9aad

Ciddii ku xad gudubta ama isku dayda ineey ku xad gudubto go'aannadan Sharciga ayaa lala tiigsanayaa.

Qodobka 10aad

Sharcigan wuxuu dhaqan galayaa maanta oo Taariikhdu ay tahay 21ka Oktoobar 1975, waxaana lagu soo saari donaa Faafinta Rasmiga ah ee J. D. S.

Muqdisho, 21 Oktoobar 1975.

MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*S. Jaalle Maxamed Siyad Barre*

**SHARCI L. 62 ee 21 Oktoobar 1975.**

**La wareegid ganacsiga dibad ka keenko iyo qaybinta: dharka, maacuunka guryaha yo qolabka xaafiisyada.**

MADAXWEYNAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Warqadda 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO AQOONSADAY Inay tahay lagama maarmaan in lala wareego ganacsiga dibad ka keenka iyo qaybinta, dharka, maacuunka guriyaha ıyo qalabka Xafiisyada;

ISAGOO TIXGELINAAYA G'aanka Golaha Sare ee Kacaanka iyo ka Xighayayaasha Dawladda.

WUXUU SOO SAARAYA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Marka laga bilaab taariikhda u dhaqan galo sharcigan, waxay Dawladdu la wareegtay dhammaan ganacsiga dibad ka keenka waxyaabaha hoos ku tilmaaman oo ay la jiraan wixii furdada yaala iyo wixii L. C. loo furay; Dawladda kaliya ayaa lahaaneysa u qaybinta dukanleyda yar-yarka ah ee ka beecmushtara waxa lala wareegay:

b) Dharka nooc kasta ha ahaadee (ogni genere di abbigliamento).
t) Maacuunka guriyaha lagaga dhaqmo nooc kasta ha noqdee oo ay la jiraan kuwa ku socda korontada iyo kuwa gaaska;

j) Qalabka lagaga dhaqmo Xafiisyada nooc kasta ahaadeenee oo ay la jiraan waxa loo yaqaanno «elettrodomestici».

Qodobka 2aad

Dukaanleyda yar yarka ah ee ka beecmushtari jirey waxyaabaha ku xusan qodobka 1aad ee sharcigan ee Dawladdu la wareegtay waa iney caddeeyaan (denuncia) wixii qalab ee maanta ku jira dukaannadooda ayago liiska (qalabka lala wareegay u geeynaya Ciidamada Ilaaliya canshuuraha (Polizia Tributaria), meeshii aney joogin Ciidamada Canshuurtuna waa iney u geeyaan Saldhiga Boliiska ee ugu dhow.

Qodobka 3aad

Ruqsadihii horey loo bixiyay ee la xiriira ganacsiga dibad ka keenka waxyaabaha lagu xusay qodobka 1aad ee sharcigan oo ay Dawladdu la wareegtay, waa la baabi'iyay, marka laga bilaabo taariikhda u dhaqan galo sharcigan.

Qodobka 4aad

Waxaa la dhisi doonaa Wakaalad ama Wakaalado maamuxla waxyaabaha Dawladdu la wareegtay ee Sharcigan lagu tilmaamay.

Qodobka 5aad

Ciidamada Amngia ayaa loo xilsaaray inay fuliaan sharcigan.

Qodobka 6aad

Ciddiik ku xad gudubta amaa isku dayda ineey ku xadgudubto go' aannada sharcigaan lagu xusay, sharciga ayaa lala tiigsanayaa.

Qodobka 7aad

Guddoonshaha Golaha Sare ee Kacaanka wuxuu awood u leeyahay inuu soo saaro Xeer lagu faahfaahinaayo Sharcigan.

Qodobka 8aad

Sharcigan wuxuu dhaqan galayaa maanta oo taariikhdu ay tahay 21ka Oktoobar 1975, waxaana lagu soo saaari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 21 Oktoobar 1975.

MADAXWEYNAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

*S. Jaalle Maxamed Siyad Barre*

SHARCI L. 63 ee 21 Oktoobar 1975.
Keenida iyo qoybinta qayabka Takhtarrada, Caafimaadka cuntoda daaweysan ee Caruurta iyo Kiimikoda.

MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Warqaddii 1aad iyo Tii 2aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY Sharciga lam. yahay 18 taariikh 11-3-1972 ee Wakaaladda Daawooyinka.

IASGOO GARTAY Iney tahay lagama maarmaan in lala wareego ganacsiga dibad ka keenka iyo qaybinta Qalabka Takhtarrada iyo Caafimaadka cuntada, cabdida iyo nadaafadda daaweysan ee carruurta iyo wixii kiimiko ah.

ISAGOO TIXGELIYEY Go'aanka Golaha Sare ee Kacaanka iyo kan Xoghayayaasha Dawladda;

WUXUU SOO SAARAYA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Qalabka Takhtarrada iyo Caafimaadka, cuntada, Cabidda iyo nadaafadda daaweysan ee Caruurta, wixii kiimiko ah iwm., waxaa keli ahaan Waddanka keeni kara qaybinna kara Wakaaladda Daawooyinka (ASPIMA).

Qodobka 2aad

Wasaaradda Caafimaadka iyo Wakaaladda Daawooyinka (ASPIMA), ayaa loo xilsaaray iney hirgeliyaan Sharcigaan.

Qodobka 3aad

1. Sharcigani horay ayuu ka dhaqan gelayaa waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyada Dimoqradiga Soomaliya.

2. Qof kasta waxaa ku khasab ah inuu fuliyo sharcigan dadkana ku khasbo.

Muqdisho, 21 Oktoobar 1975.

MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*S. Jaalle Maxamed Siyad Barre*

**SHARCI L. 64 ee 21 Oktoobar 1975.**
**Keenidda iyo qaybinta qalabka biyaha looga soo saaro Wabiyada iyo ceelasha.**

MADAXWEYNAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKU ARKAY Sharciga lamb. yahay 28 taariikh 20-2-1971 ee Oktoobar 1969.

MARKUU ARKAY Sharciga lamb. yahay taariikh ee Wakaaladda Horumarinta Biyaha iyo beddaladda lagu sameeyey.

ISAGOO GARTAY In loo baahan yahay in Dawladdu keli ahaan u keento una qaybiso qalabka ceelasha iyo webiyada looga soo saaro biyaha.
ISAGOO TIXGELIYEY Go'aanka Golaha Sare ee Kacaanka iyo kan Xoghayayaasha Dawladda.

WUXUU SOO SAARAYA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Qalabka ceelasha iyo webiyada biyaha looga soo saaro oo ay ka mid yihiin bombooyinka, dhuumaha, matoorada ceelaaha, matoorada webiyada, waxaa keli ahaan, Waddanka keeni kara qaybina kara Wakaladda Horumarinta Biyaha.

Qodobka 2aad

Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha iyo Wakaaladda Horumarinta Biyaha ayaa laga doonyaa iney sharcigaan hirgeliyaan.

Qodobka 3aad

1. Sharcigani horay ayuu ka dhaqan gelayaa waxaana lagu soo doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyada Dimcqradiga Soomaaliya.
2. Qof kasta waxaa ku khasab ah inuu fuliyo sharcigan dadkana ku khasbo.

Muqdisho, 21 Oktoobar 1975.

MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*S. Jaalle Maxamed Siyad Barre*

**SHARCI L. 65 ee 21 Oktoobar 1975.**
**Keenidda iyo qaybinta Dahabka iyo Qalinka.**

MADAXWEYNAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Warqadda 1aad iyo Tii 2aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY Sharciga lamb. yahay 26 ee soo baxay 7 Maajo 1970 ee lagu tolleeyay Bangiga Qaranka;

ISAGOO ARKAY Sharciga lamb. yahay ee 21kii Oktoobar 1975 oo ay Dawladda kula wareegtay ganacsiga dibad ka keenka iyo qaybinta darka, maacuunka, baabuurta, qalabka dayactirka iwm.

ISAGOO AQOONSADAY Iney tahay lagama maarmaan in lala wareego keenidda iyo qaybinta dahabka iyo Qalinka.

ISAGOO TIXGELINAAYA Go'aanka Golaha Sare ee Kacaanka iyo kan Xoghayayaasha Dawladda;

WUXUU SOO SAARAYA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

1. Marka laga bilaabo taariikhda uu dhaqan galo sharcigaan waxeey Dawladdu la wareegtay dhammaan ganacsiga dibad ka keenka iyo u qaybinta dukaanleyda dahabka iyo qalinka.

2. Alaabta lagu xusay xubinta kore ee sharcigaan waxaa keli ahaan keeni kara dalkoo idil kuna qaybin kara Bangiga Dhexe ee Qaranka.

Qodobka 2aad

Wasaaradda Maaliyada iyo Bangiga Dhexe ee Qaranka ayaa loo xilsaaray ineey hirgeliyaan Sharcigaan.

Qodobka 3aad

1. Sharcigani horay ayuu ka dhaqan gelayaa waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyada Dimoqradiga Soomaaliya.

2. Qof kasta waxaa ku khasab ah inuu fuliyo sharcigan dadkana uu ku khasbo.

Muqdisho, 21 Oktoobar 1975.

MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*S. Jaalle Maxamed Siyad Barre*

*LIFAAQ KALIYA*

## BANKIGA DHEXE EE QARANKA

*(Liska Alaabta)*

Ganacsiga dibad ka keenka iyo qeybinta alaabta hoos ku tilmaaman, waxay ka mid noqonaayaan ujeedada Bankiga Dhexe ee Qaranka:

1. Dahabka ceerin nooc kasta iyo sii kasta ha ahaadee;
2. Qalinka ceerin nooc kasta iyo sii kasta ha ahaadee.

**SHARCI L. 66 ee 21 Oktoobar 1975.**

**La Woreegid ganacsiga dibad ka keenko alaabta musikada.**

**Masawirka iyo Siinamada.**

MADAXWEYNAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Warqadii 1aad iyo Tii 2aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

ISAGOO AQOONSADAY Inay tahay lagama maarmaan in lala wareego ganacsiga dibad ka keenka iyo qaybinta wax alla wixii alaab ah ee Musikada ku saabsan.

ISAGOO ARKAY Sharciga lamb. yahay 26 ee 25-2-1973 oo lagu dhiasy Makaaladda Filimada Soomaaliyeed.

ISAGOO TIXGELINAAYA Go'aanka Golaha Sare ee Kacaanka

iyo kan Xoghayayaasha Dawladda;

WUXUU SOO SAARAYA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

1. Marka laga bilaabo taariikhda u dhaqan galo sharcigan, waxay Dawladdu la wareegtay dhammaan ganacsiga dibad ka keenka wax alla wixii alaab ah ee Musikada lagu tumo ama lagu ciyaaro, ha ku jiraan furdada ama L. C. ha u furaadeena.

2. Waxaa kaloo lala wareegay alaabta masawirada, kuwa siinemada iyo wixii la xiriira.

Qodobka 2aad

Wax alla wixii alaabtaa ah oo qodobka 1aad ee sharcigan lagu xusay, waxaa keli ahaan dalkoo idil keeni kara kuna qeybin kara Wakaaladda Filimada Soomaaliyeed.

Qodobka 3aad

Ruqaadihii horey loo bixiyay ee la xiriira ganacsiga dibad ka keenka waxyaabaha lagu xusay qodobka 1aad ee sharcigan waa la baabi'iyay.

Qodobka 4aad

Wasaaradda Warfaafinta iyo Hanuuninta Dadweynaha iyo Wakaaladda Filimada Soomaaliyeed ayaa masuul ka ah hirgelinta Sharcigan.

Qodobka 5aad

Alaabta muusikada, kuwa masawirada, sinamada iyo wixii la xiriira ee lagu xusay Sharcigan waxey ku tilmaaman yihiin liiska ku lifaaqan Sharcigan.

Qodobka 6aad

Ciidamada Amniga ayaa loo xilsaaray inay fuliyaan sharcigan.

Qodobka 7aad

Guddoonsha Golaha Sare ee Kacaanka wuxuu awood u leeyahay inuu soo saaro xeer lagu faahfaahinaayo sharcigan.

Qodobka 8aad

Sharcigan wuxuu dhaqan galayaa maanta oo taarikhdu ay tahay 21ka Oktoobar 1975, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 21 Oktoobar 1975.

MADAXWEYNAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

*S. Jaalle Maxamed Siyad Barre*

*LIFAAQ KELIYA*

## WAKAALADDA FILIMADA

Ganacsiga dibad ka keenka iyo qeybinta alaabta hoos ku tilmaaman, waxay ka mid noqonaayaan ujeeddada Wakkaaladdu:

1. Alaabta muusikada lagu tumo ama lagu cayaaro (musical instruments) nooc kasta ha ahaadeenee iyo wixii la xiriira ee qalabka musikada.

2. Alaabta masawirada, kuwa sinimada iyo wax allaale ee alaab ah la xiriira.

3. Alaabka Isgarsiinta iyo Codka (Radio and Records ex.) iyo wax-allaale oo la xiriira.

SHARCI L. 67 ee 21 Oktoobar 1975.
Dhismaha Wakaaladda ganacsiga Gaadiidka iyo Qalabk dayactirka.

MADAXWEYNAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Warqadda 1aad iyo Tii labaad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

ISAGOO TIXGELINAYA Go 'aankii Golaha Sare ee Kacaanka yio kan Xoghayayaasha Dawladda;

WUXUU SOO SAARAYA

Sharciga soo socda:

*HABKA GUUD*

Qodobka 1aad

*Dhismaha Wakaaladda*

1. Wakaaladda Ganacsiga Gaadiidka iyo Qalabka Dayactirka Baabuurta ayaa halkan lagu dhisay oo hadda kaddib la odhan doono «Wakaalad» si loo daryeelo danaha Ummadda.

2. Wakaaladdu waxay tahay mid madax bannaan oo jirid iyo shakhsiyad qaanuuni ah leh.

3. Wakaaladdu waxay u hoggaansami doontaa xeerkan iyo xeerarka soo socda:

a) Xeerka lamb. 16 ee soo baxay 1dii Abril 1970 iyo toosintii ka dambaysay ee Wakaaladaha Madaxa Bannaan.

b) Xeer lamb. 36 ee soo baxay 22kii Abril 1972 ee ku saabsan Shaqaalaha Wakaaladaha Madaxa Bannaan.

t) Xeerka lamb. 58 ee baxay 31kii Luulyo 1972 ee ku saabsan Lacagaha Wakaaladaha Madaxa Bannaan.

Qodobka 2aad

*Xarunta iyo Laamaha Wakaaladda*

Xarunta Wakaaladdu waxay ahaan doontaa magaalada Muqdisho, haddii loo baahdo se waxay ku yeelan doontaa Laamo Gobollada iyo Degmoyinka Jamhuuriyadda Dimuqradiga ee Soomaaliya.

Qodobka 3aad

*Ujeedooyinka Wakaaladda*

Ujeeddooyinka Wakaaladda waxay tahay:

1. Iney dibadda ka keento wax alle wixii Gaadiid (auto-veicoli) ee Waddanku u baahanyahay.
2. Iney ka iibso gaadiidka ay dibadda ka keentay Wasaaradaha, Wakaaladaha, Hay'daha kale duwan ee Dawladda, Sharikadaha iyo Shacabka intaba.
3. Iney kabto baabuurta Wakaaladaha Dawladda ee aanan hosa u gaara lahayn ayaddoo ka qaadeysa wixii makhaasiira ee lagu khraj gareeyay.
4. Iney qorsheyso baahida Dalka xaga Gaadiidka tilaabana ka qaaddo si loo daryeelo danaha Ummadda.
5. Iney maamusho Hoosooyinka lala wareegay.
6. Iney dibadda ka keento kana baacmushtarto wax alla wixii qaba (Pezzi di ricambio) ee lagu kabo baabuurta socota ee Waddanka.
7. Iney baabuureyda Waddanka u habeeyso nidaamka Iskaashato si ay isu taageeraan, u wada shaqeystaan, wixii ay xoogsadaanna si xaqa u qaybsadaan.
8. Iney habeeyso, iskuna dawdo Hoosooyinka yar yarka ah ee Waddanka.
9. Iney ka shaqeyso sidii farsamayaqaanada agoontooda sare loogu qaadi lahaa.

Qodobka 4aad

*Awooda*

Wakaaalddu waxay awood u leedahay, iyadoon ku xad gudbin Xeerkan, awood ay ku fulin karto ujeeddooyinka ku xusan qodobka saddexaad ee xeerkan.

Qodobka 5aad

*Ilaalinta Guud ee Wakaaladda*

1. Ilaalinta guud ee Wakaaladda waxaa yeelan doona Xoghayaha Wasaaradda Gaadiidka.

2. Xoghayuhu wuxuu awood u leeyahay inuu siiyo awaamiir ama talooyin markay ugu muuqato iney hagaajineyso maamulka Wakaaladda.

## *QAYBTA II*

### *Xubnaha Wakaaladda*

### Qodobka 6aad

*Maareeye*

1. Wakaaladda waxaa madax u noqon doona Maareye Guud waxaana lagu magacaabi doonaa Dekreto uu soo saaro Guddoonshaha Golaha Sare ee Kacaanka isagoo tixgelinaya ra'yiga Xoghayaha Wasaaradda Gaadiidka.

2. Wakaaladdu waxay ka koobnaan doontaa waaxyo, xubno iyo laamo, waxayna haddii loo baahdo laamo ka furan kartaa Gobollada iyo Degmooyinka si ay u gudato hawsha loo xilsaaray.

### Qodobka 7aad

*Hawsha Maareeyaha Guud*

1. Maareeyaha Guud waxaa loo xilsaaray, isagoo masalaaya Wakaaladda, fulinta ujeedooyinka ku xusan qodobka saddexaad ee Xeerkan, hawshiisuna waxay tahay:

a) Inuu saxiixo heshiisyada ay Wakaaladdu dhinac ka tahay.

b) Waxaa uu mas'uul ka noqon doonaa habka maamulka shaqada Wakaaladda wuxuuna awood u yeelan doonaa inuu sameeyo wieeii go'aan ah ee ku saabsan maamulka iyo canaanta shaqaalaha Wakaaladda.

t) Inuu ka mas'uul noqdo lacagta iyo hantida Wakaaladda, isagoo raacaya sharciyada Dalka.

j) Inuu ku shaqaaqo wixii go'aan ah ee deg deg ah asagoo isla markaa ogeysiinaya Xoghayaha Wasaaradda Gaadiidka.

x) Inuu bixiyo wixii amar lagama maarmaan ah si hawsha maamulka guud iyo xisaabuhu ay hab fiican ugu socdan.

kh) Inuu fuliyo wixii hawl-maamulka shaqada Wakaaladda ee caadi ah.

d) Inuu fuliyo wixii hawl-maamulka shaqada Wakaaladda ee aan caadi ahayn isagoo ka haysta oggolaansho qoraal ah Xoghayaha Wasaaradda Gaadiidka.

2. Marka uu shaqada ka maqnaado Maareeyaha Guud ama ay jiraan asbaab ka reeba shaqada, waxaa uu u magacaabi doonaa ku sime Sarkaal ka tirsan waaxyaha Wakaaladda isagoo ka haysta oggolaasho Xoghayaha Dawuladda.

Qodobka 8aad

*Xuquuqda Dhaqaalaha ee Shaqaalaha*

Xuquuqda qaynuuniga iyo tan dhaqaalaha ee Maareeyaha Guud, Agaasimayaasha Waaxyaha iyo Shaqaalaha kale ee Wakaaladda, waxaa xukumi doona xeerka lamb. 36, taarikh 22 Abriile 1972 ee ku saabsan shaqaalaha Wakaaladaha Madaxa Bannaan.

Qodobka 9aad

*Magacawga Agaasimayaasha*

Wakaaladdu waxay lahaan doontaa Agaasime ama Agaasimeyaal waaxood oo lagu magacaabi doono Dekreeto uu soo saaro Guddoonshaha G. S. K. isagoo tixgelinaya ra'yiga Xoghayaha Wasaaradda Gaadiidka.

Qodobka 10aad

*Qorrinka Shaqaalaha*

Wakaaladdu waxay u qoran kartaa Shaqaalaha ay u baahan tahay ayadoo raacaysa sharciyada u dhigan qorista Shaqaalaha Dalka.

Qodobka 11aad

*Raasamaalka Wakaaladda*

Raasamaalka Wakaaladdu wuxuu ka koobnaan doonaa:

1. Lacag 500.000 Sh. ah oo unug ahaan Dawladdu ay ugu deeqday Wakaaladda si ay hawsheeda ugu bilaawdo.
2. Baabuurta, Makiinadaha lagu kabo baabuurta, Hoosooyinka, qalabka dayactirka, Bakhaarrada, xafiisyada iyo guryaha ay Dawladdu la warreegtay.
3. Wixii lacag ah ee ka gala hawsha ay qabato Wakaaladdu.
4. Wixii lacag kayd ah ee sanad kasta u dhiganta Wakaaladda (Riserved Fund).
5. Wixii ka soo gala «Commission» hawlaha ay qabato.
6. Wixii hanti ah ee ka soo gala Wakaaladda deeq ama si kale.

Qodobka 12aad

*Miisaaniyada Wakaaladda*

1. Maareeyaha Guud marka ay tahay 30ka Oktoobar ama ınta ka horreya sannad kasta waa inuu isku dubbaridaa miisaaniyada ku saabsan sannadka maaliyadda soo galeysa isagoo faahfaahinaaya kuna muujinaaya

lacagta soo geli doonta ama ka bixi doonta Wakaaladda sannadka soo socda, wuxuuna hor dhigi doonaa si loo oggolaado Xoghayaha Wasaaradda Maaliyadda iyo Wasaaradda Gaadiidka.

2. Miisaaniyadda lacagta sannadka ee Wakaaladda waa in ay ahaataa mid la socota oo tixooelisa miisaaniyada Dawladda.

Qodobka 13aad

*Xidhitaanka Miisaaniyada*

1. Maareeyaha Guud marka ay tahay 31 Maarso ama inta ka horeysa sannad kastsa waa inuu diyaariyo iskuna dubbaridaa xiritaanka miisaaniyadda ee sannadka la soo dhaafay, isagoo isku hagaajiyey xisaabtii sannadkaa iyo bandhigii macaashka iyo kharashka Wakaaladda, isla markaasna u gudbiya Wasaaradda Maaliyada iyo tan Gaadiidka.

2. Xoghayaha Wasaaradda Gaadiidka wuxuu awood u leeyahay, isagoo la tashanaya Xoghayaha Wasaaradda Maaliyada, inuu oggolaado miisaaniyadda xiritaanka, wuxuuna amar ku soo bixin doonaa in lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda ayadoo ay kharajka bixinayso Wakaaladda.

Qodobka 14aad

*Amaah Sharci ah*

Wakaaladdu ayadoo haysata guddonka Xoghayaha Wasaaradda Gaadiidka wax waa ka amaahan kartaa mu'asaasadaha amaahda ee dibedda iyo Bankiyada gudaha si ay u hirgeliso xilkii la saaray ama ujeedooyinkii Wakaaladda.

Qodobka 15aad

*Shaqaale*

Sida uu dhigayo qodobka 17aad ee Xeerka Shaqaalaha Dawladdu, Maareeyaha Guud, Agaasimayaasha Waaxaha iyo shaqaalaha kale ee Wakaaladdu ma geli karaan ganacsi amase farsamo lid ku ah danaha iyo ujeedooyinka Wakaaladda.

Qodobka 16aad

*Maamulka Lacagta*

Maamulka lacagta ee Wakaaladda waxaa xukumaaya xeerka lamb. yahay 58 ee soo baxay 31kii Luuliyo 1972 ee ku saabsan Wakaaladaha Madaxa Bannaan.

## *QAYBTA III*

### *Qodobka Xiritaanka*

### Qodobka 17aad

### *Xeerarka Guud*

Guddoonshaha Golaha Sare Kacaanka wuxuu awood u leeyahay, isagoo tixgelinaya talada Xoghayaha Wasaaradda Gaadiidka, inuu guddooniyo xeer guud oo Wakaaladda xukuma si looga hortago dhibaatada ka iman karta wixii aan ku sheegneyn xeerkan.

### Qodobka 18aad

### *Dhaqan galid*

1. Sharcigani hore ayuu ka dhaqan galayaa waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyada Soomaaliya.

2. Sharcigani waa inuu ka mid noqdaa sharciyada Rasmiga ah iyo Xeerarka Jamhuuriyada Dimoqradiga Soomaaliya.

3. Qof waliba waa inuu dhawraa oo tixgaliyaa kuna qasbaa dadka kale in ay dhawraan sharcigan.

Muqdisho, 21 Oktoobar 1975.

MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*S. Jaalle Maxamed Siyad Barre*

SHARCI L. 68 ee 21 Oktoobar 1975.

**Dhismaha Wakaladda Ganacsiga Dharka iyo Maacuunka.**

MADAXWEYNAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Warqada 1aad iyo Tii 2aad ee Kacaanca 21kii Oktoobar 1969.

ISAGOO TIXGELINAYA Go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka iyo kan Xoghayayaasha Dowladda.

MADAXWEYNAHA

Sharciga soo socda:

*HABKA GUUD*

Qodobka 1aad

1. Wakaaladda Ganacsiga Dharka iyo Maacuunta ayaa halkan lagu dhisay oo hadda kaddib la odhan doono «Wakaalad» si loo daryeelo danaha Ummadda.

2. Wakaaladdu waxay tahay mid madex bannaan oo jirid iyo shakhsiyad qaamuuni ah leh.

3. Wakaaladdu waxay u hoggaansami doontaa xeerkan iyo xeerarka soo socda:

a) Xeerka lamb. 16 ee soo baxay 1dii Abriil 1970 iyo toosintii ka dambaysey ee Wakaaladaha Madaxa Bannaan.

b) Xeer lamb. 36 ee soo 22kii Abriil 1972 ee ku saabsan Shaqaalaha Wakaaladaha Madaxa Bannaan.

t) Xeerka lamb. 58 ee soo baxay 31kii Luuliyo 1972 ee ku saabsan Lacagaha Wakaaladaha Madaxa Bannaan.

Qodobka 2aad

*Xarunta iyo Laamaha Wakaaladda*

Xarunta Wakaaladdu waxay ahaan doontaa magaaladda Muqdisho, haddii loo baahdo se waxay ku yeelan doontaa Laamo Gobollada iyo Degmooynika Jamhuuriyada Dimoqradgia ee Soomaaliya.

Qodobka 3aad

*Ujeeddooyinka Wakaaladda*

Ujeeddooyinka Wakaaladda waxay tahay:

1. Iney kaligeed dibadda ka keento (Importazione) wax alla wixii dhara, wixii labisa (abbigliamento) iyo waxa guriga la dhigto (arredamento).
2. Iney kaligeed dibadda ka keento wax alla wixii maacuuna (utensili) ee guryaha lagaga dhaqmo.
3. Iney dharka iyo maacuunka u qaybiso (distribution) dukaanleyda yar yarka ah ee Waddanka, ayadoo isla markaas u gooyneysa qiima xaddadan.
4. Iney kontroosho in in dukaanleeydu ay ku gadeeyso dharka iyo maacuunka qiimihii loo gooyay.
5. Iney qorshayso baahida Waddanka xagga dharka iyo xagga maacuunka ayadoo ka qaadeysa had iyo jeer tilaabada ku habboon si loo daryeelo danaha Ummadda.

Qodobka 4aad

*Awooda*

Wakaaladdu waxay awood u leedahay, iyadoon ku xad gudbin Xeerka, awood ay ku fulin karto ujeeddooyinka ku xusan qodobka Seddexaad ee Xeerkan.

Qodobka 5aad

*Ilaalinta Guud ee Wakaaladda*

1. Ilaalinta guud ee Wakaaladda waxaa yeelan doona Xoghayaha Wasaaradda Ganacsiga.

2. Xoghayahu wuxuu awood u leeyahay inuu siiyo awaamir ama talooyin markay ugu muuqato iney hagaajinayso maamulka Wakaaladda.

*QAYBTA II*

*Xubnaha Wakaaladda*

Qodobka 6aad

*Maareeye*

1. Wakaaladda waxaa madax u noqon doona Maareeye Guud waxaana lagu magacaabi doonaa Dekreto uu soo saaro Guddoonshaha Golaha Sare ee Kacaanka isago tixgelinaya ra'yiga Xoghayaha Wasaaradda Gaancsiga.

2. Wakaaladdu waxay ka koobanaan dontaa waaxyo, xubno iyo laamo, waxayna haddii loo baahdo laamo ka furan kartaa Gobollada iyo Degmooyinka si ay u gudato hawsha loo xilsaaray.

Qodobka 7aad

*Hawsha Maareeyaha Guud*

1. Maareeyaha Guud waxaa loo xilsaaray, isagoo masalaaya Wakaaladda, fulinta ujeeddooyinka ku xusan qodobka saddexaad ee Xeerkan, hawshiisuna waxay tahay:

a) Inuu saxiixo heshiisyada ay Wakaaladdu dhinac ka tahay.
b) Waxaa uu mas'uul ka noqon doonaa habka maamulka shaqada Wakaaladda wuxuuna awood u yeelan doonaa inuu sameeyo wixii go'aan ah ee ku saabsan maamulka iyo canaanta shaqaalaha Wakaaladda.

t) Inuu ka mas'uul noqdo lacagta iyo hantida Wakaaladda, isagoo raacay sharciyada Dalka.

j) Inuu ku dhaqaaqo wixii go'aan ah x deg deg ah asagoo isla markaa ogeysiinaya Xoghayaha Wasaaradda Ganacsiga.

x) Inuu bixiyo wixii amar lagama maarman ah si hawsha maamulka guud iyo xisaabuhu ay hab fiican ugu socdaan.

kh) Inu fuliyo wixii hawl-maamulka shaqada Wakaaladda ee caadi ah.
d) Inuu fuliyo wixii hawl-maamulka shaqada Wakaaladda ee aan caadi ahayn isagoo ka haysta oggolaansho qoraal ah Xoghayaha Wasaaradda Ganacsiga.

2. Marka uu shaqada ka maqnaado Maareeyaha Guud ama ay jiraan asbaab ka reeba shaqada, waxaa uu u magacaabi doonaa ku sime Sarkaal ka tirsan Waaxyaha Wakaaladda isagoo ka haysta oggolaasho Xoghayaha Dawladda.

Qodobka 8aad

*Xaquuqda dhaqaalaha ee Shaalaha Wakaaladda*

Xuquuqda qaynuuniga iyo tan dhaqaalaha ee Maareeyaha Guud, Agaasimayaasha Waaxyaha iyo Shaqaalaha kale ee Wakaaladda, waxaa xukumi doona Xeerka lamb. yahay 36, taariikh 22 Abriil 1972 ee ku saabsan shaqaalaha Wakaaladaha Madaxa Bannaan.

Qodobka 9aad

*Magacawga Agaasimayaasha*

Wakaaladdu waxay lahaan doontaa Agaasime ama Agaasimeyaal Waaxood oo lagu magacaabi doono Dekreto uu soo saaro Guddonshaha G. S. K. isagoo tixgelinaya ra'yiga Xoghayaha Wasaaradda Ganacsiga.

Qodobka 10aad

*Qorrinka Shaqaalaha*

Wakaaladdu waxay qoran kartaa shaqaalaha ay u baahantahay ayadoo raacaysa sharciyada u dhigan qorista shaqaalaha Dalka.

Qodobka 11aad

*Raasamaalka Wakaaladda*

Raasamaalka Wakaaladdu wuxuu ka koobanaan doonaa:

1. Lacag 500.000 Sh. ah oo unug ahaan Dawladdu ay ugu deeqday Wakaaladda, si ay hawsheeda ugu bilaawdo.
2. Wixii lacag ah ee ka gala hawsha ay qabato Wakaaladdu.
3. Wixii lacag kayd ah ee sanad-kasta u dhiganta Wakaaladda (Riserved fund).
4. Wixii ka soo gala «Commission» hawlaha ay qabato.
5. Wixii hanti ah ee ka soo gala Wakaaladda deeq ama si kale.

Qodobka 12aad

*Miisaaniyada Wakaaladda*

1. Maareeyaha Guud marka ay tahay 30ka Oktoobar ama inta ka horreysa sannad kasta waa inuu isku dubbaridaa miisaaniyada ku saabsan sannadka maaliyadda soo geleysa isagoo faahfaahinaaya kuna muujinaaya lacagta soo geli doonta ama ka bixi doonta Wakalaadda sannadka soo socda, wuxuuna hor dhigi doonaa si loo oggolaado Xoghayaha Wasaaradda Lacagta iyo Wasaaradda Ganacsiga.

2. Miisaaniyadda lacagta sannadka ee Wakaaladda waa in ay ahaataa mid la socota oo tixgelisa miisaaniyada Dawladda.

Qodobka 13aad

*Xidhitaanka Miisaaniyada*

1. Maareeyaha Guud marka ay tahay 31 Maarso ama inta ka horeysa sannad kasta waa inuu diyaariyo, iskuna dubbaridaa xiritaanka miisaaniyadda sannadka la soo dhaafay, isagoo isku hagaajiyey xisaabtii sannadkaa iyo bandhigii macaashka iyo kharashka Wakaaladda, isla markaasna u gudbiyo Wasaaradda Ganacsiga iyo tan Maaliyada.

2. Xoghayaha Wasaaradda Ganacsiga wuxuu awood u leeyahay, isagoo la tashanaya Xoghayaha Wasaaradda Maaliyada, inuu oggolaado miisaaniyadda xiritaanka, wuxuuna amar ku soo bixin doonaa in lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda ayadoo ay kharajka bixinayso Wakaaladdu

Qodobka 14aad

*Amaah Sharci ah*

Wakaaladdu ayadoo haysata guddoonka Xoghayaha Wasaaradda Ganacsiga wax waa ka amaahan kartaa mu'asaasadaha amaahda ee dibedda iyo Bankiyada gudaha si ay u hirgeliso xilkii la saaray ama ujeedooyinkii Wakaaladda.

Qodobka 15aad

*Shaqaale*

Sida uu dhigayo qodobka 17aad ee Xeerka Shaqaalaha Dawladdu, Maareeyaha Guud, Agaasimayaasha Waaxaha iyo Shaqaalaha kale ee Wakaaladdu ma geli karaan ganacsi amase farsamo lid ku ah danaha iyo ujeedooyinka Wakaaladda.

Qodobka 16aad

*Maamulka Lacagta*

Maamulka lacagta ee Wakaaladda waxaa xukumaaya xeerka lamb. yahay 58 ee soo baxay 31kii Luulyo 1972 ee ku saabsan Wakaaladaha Madaxa Bannaan.

*QAYBTA III*

*Qodobka Xiritaanka*

Qodobka 17aad

*Xeerarka Guud*

Guddoonshaha Golaha Sare Kacaanka wuxuu awood u leeyahay, isagoo tixgelinaya talada Xoghayaha Wasaaradda Ganacsiga, inuu Guddoomiyo xeer guud oo Wakaaladda xukuma si looga hortago dhibaatada ka iman karta wixii aan ku sheegnayn xeerkan.

Qodobka 18aad

*Dhaqan galid*

1. Sharcigani hore ayuu ka dhaqan gelayaa waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyada Dimoqradiga Soomaaliya.
2. Sharcigani waa inuu ka mid noqdaa sharciyada Rasmiga ah iyo xeerarka Jamhuuriyada Dimoqradiga Soomaaliya.
3. Qof waliba waa inuu dhawraa oo tixgeliyaa kuna qasbaa dadka kale in ay dhawraan sharcigan.

Muqdisho, 21 Oktoobar 1975.

MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*S. Jaalle Maxamed Siyad Barre*

# BOGGA LABAAD

**XEER L. 147 ee 21 Oktoobar 1975.**

**Keenidda iyo qeybinta cagafcagafyada iyo makiinadaha Beeraha.**

MADAXWEYNAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaanshada 1aad iyo taa 2aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga lamb. 61 ee 21 Oktoobar 1975 oo ay Dawladda la wareegtay ganacsiga dibadda ka keenka iyo qeybinta cagafcagafyada iyo makiinadaha Beeraha iyo wixii la xiriira;

ISAGOO ARKAY Sharciga lamb. 60 ee 11-10-1975 ee lagu dhisay Wakaaladda Beeraha iyo Cagafcagafyada iyo beddelaadii ka dambeeyay;

ISAGOO AQOONSADAY Inay tahay lagama maarmaan in waxyaabaha lala wareegay keenidooda iiyo qeybintooda loo xilsaaro Wakaaladda Beeraha iyo aCgafcagafyada;

ISAGOO TIXGELINAAYA Go'aanka Golaha Sare ee Kacaanka iyo ka Xoghaayayaasha Dawladda;

WUXUU XEERAYAA

Qodobka 1aad

Cagafcagafyada, makiinadaha beeraha, qalabka kale oo beeraha looga shageeyo iyo baahitirkooda, waxaa keli ahaan u keeni kara dalkoo idil kuna qeybin kara Wakaaladda Beeraha iyo Cagafcagafyada (ONAT).

Qodobka 2aad

Wasaaradda Beeraha iyo Wakaaladda Beeraha iyo Cagafcagafyada (ONAT) ayaa ka musal ah hirgelinta xeerkan.

Qodobka 3aad

Alaabta lagu xusay Xeerkan waxay ku tilmaaman yihiin liis oo ku lifaaqan Xeerkan.

Qodobka 4aad

Xeerkani wuxuu dhaqan galayaa maanta oo taariikhdu ay tahay 21ka Oktoobar 1975, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 21 Oktoobar 1975.

MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

*LIFAAQ KELIYA*

WAKAALADDA CAGAFYADA IYO HAWLAHA BEERAHA

Ganacsiga dibad ka keenka iyo qeybinta alaabta hoos ku tilmaaman, waxay ka mid noqonaayaan ujeeddada Wakaaladdu:

1. Makiinadaha iyo qalabka Beeraha looga shaqeeyo iyo baaritirkooda nooc kasta ha ahaadeenee iyo wax allaale oo la xiriira.

2. Wax allaale oo Fertiliser ee Beeraha loogu tala galay.

---

**XEER L. 148 ee 21 Oktoobar 1975.**

**Keenidda Qalabka Xafiisyada, Dugsiyada, Makiinadaha Qoraalka iyo Xisaabaadka.**

MADAXWEYNAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Warqadda Koowaad iyo tii 2aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

MARKU ARKAY Sharciga lamb. 61 ee 21 Oktoobar 1975 oo ay Dawladda la wareegtay ganacsiga dibad ka keenka iyo qeybinta qalabka Xafiisyada, Dugsiyada, Makiinadaha Qoraalka iyo Xisaabaadka.

MARKUU ARKAY Sharciga lamb. 3 ee 2-1-1971 oo lagu dhisay Wakaaladda Matbacadda Qaranka.

ISAGOO AQOONSADAY Inay tahay lagama maarmaan in Qalabka ka keenidda dibadda loo xilsaaro kali ahaan Wakaaladda Matbacadda Qaranka kuwaa soo ah qalabka Xafiisyada, Dugsiyada, Makiinada Qoraalka iyo xisaabaadka iyo wixii la xiriira.

ISAGOO TIXGELINAAYA Go'aanka Golaha Sareee Kacaanka iyo ka Xoghaayayaasha Dawladda.

WUXUU XEERAYAA

Qodobka 1aad

Wax alla wixii qalab ah ee looga isticmaalo Xafiisyada iyo dugsiyada oo ay soo raacaan makiinadaha qoraalka iyo xisaabaadka, xaashiyada daabacaan iyo buugaagga, waxaa keli ahaan keni kara kuna qaybin kara dalkoo idil Wakaaladda Madbacadda Qaranka Soomaaliyeed.

Qodobka 2aad

Wasaaradda Warfaafinta iyo Hanuuninta Dadweynaha iyo Wakaaladda Madbacadda Qaranka ayaa mas'uul ka ah hirgelinta Xeerkan.

Qodobka 3aad

Alaabta lagu xusay Xeerkan waxay ku tilmaaman yihiin liis ay ku lifaaqan yihiin Xeerkan.

Qodobka 4aad

Xeerkani wuxuu dhaqan galayaa maanta oo taariikhdu ay tahay 21ka Oktoobar 1975, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 21 Oktoobar 1975.

MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*S. Jaalle Maxamed Siyad Barre*

*LIFAAQ KALIYA*

WAKAALADDA MADBACADDA QARANKA

Ganacsiga dibbad ka keenka iyo qeybinta alaabta hoos ku tilmaaman, waxay ka mid noqonayaan ujeeddada Wakaaladdu:

1. Alaabta iyo Makiinadaha Xafiiska nooc kasta ha ahaadeenee.
2. Warqadaha iyo wixii laga sameeyo.
3. Alaabta wax lagu qoro ama wax lagu qabto (stationery).
4. Xaashiyada daabacan, buugagga iyo kuwa wax lagu duubto.

---

**XEER L. 149 ee 21 Oktoobar 1975.**

**Keenidda iyo qaybinta qalabka dabka ama korontada ee guryaha iyo galabka aragtida.**

MADAXWEYNAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Warqaddii 1aad iyo Tii 2aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga lamb. yahay 26 ee 7 Maajo 1970 lagu tolleeyay Sharcikadda Korontada iyo sharciga lamb. 34 ee 7-4-1973 oo lagu dhisay Wakaaladda Xooga Korontada Ummadda.

ISAGOO ARKAY Sharciga lamb. yahay ee 21kii Oktoobar 1975 oo ay Dawladdu kula wareegtay ganacsiga dibad ka keenka iyo qaybinta alaabta la xiriirta qalabka dabka iyo guriyaha iyo qalabka aragtida.

ISAGOO AQOONSADAY Inay tahay lagama maarmaan in waxyaabaha lala wareegay oo ah qalabka dabka iyo guriyaha iyo wixii la xiriira in loo xilsaaro Wakaaladda Xooga Koronta Ummadda.

ISAGOO TIXGELINAAYA Go'aanka Golaha Sare ee Kacaanka iyo kan Xoghayayaasha Dawuladda.

WUXUU XEERAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

1. Qalabka dibadda laga keeno ee dabka ama Korontada ku shaqeeyaa, looguna isticmaalo qaboojinta, kululeeynta, karinta, mayridda, alaabta Isgaarsiinta iyo cododka (Radio & Record) ee lagaga isticmaalo guryaha, xaafiisyada, makhaayadaha iyo dukaammada, waxaa keli ahaan dibadda ka keeni kara Wakaaladda Xoogga Korontada Ummadda.

2. Sidoo kale isla Wakaaladda ayaa keligeed dibadda ka keeni karta xoqodaha, miisaanada iyo mitirada iwm. qalabka aragtida (strumenti ottici) cayn kasta ha ahaadee.

3. Wakaaladda Xoogga Korontada Ummadda keliya ayaa lahaaneysa u qaybinta dukaanleyda yar-yarka ah ee beecmushtara waxa lala wareegay.

Qodobka 2aad

Wasaaradda Hawlaha Guud iyo Wakaaladda Xoogga Korontada Ummadda ayaa masuul ka ah higelinta Xeerkan.

Qodobka 3aad

Alaabta lagu xusay Xeerkan waxay ku tilmaaman yihiin liis ku lifaaqan Xeerkan.

Qodobka 4aad

Xeerkani wuxuu dhaqan galayaa maanta oo taariikhdu ay tahay 21ka Oktoobar 1975, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 21 Oktoobar 1975.

MADAXWEYNAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

*S. Gass Maxamed Siyad Barre*

*LIFAAQ KELIYA*

WAKAALADDA XOOGGA KORONTADA

Ganacsiga dibad ka keenka iyo qeybinta alaabta hoos ku tilmaaman, waxay noqonaayaan ujeeddada Wakaaladdu:

1. Alaabta Korontada ku socota (Applianrey).
2. Soo-saareyaasha korontada, qaboojiye, kuyliye iyo wax alla wixii ifiya.
3. Xaqadaha (occhiali), miisaanada iyo mitirada iwm.